



Qofka gaadiidka saaran ayaa salaamaya kan lugaynaya, kan lugaynayana wuxuu salaamayaa kan fadhiya, dadka tirada yarina kuwa tirada badan bay salaamayaan

Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-wuxuu yiri: "Qofka gaadiidka saaran ayaa salaamaya kan lugaynaya, kan lugaynayana wuxuu salaamayaa kan fadhiya, dadka tirada yarina kuwa tirada badan bay salaamayaan." Bukhaari wuxuu leeyahay ruwaad kale: "kan yari kan wayn buu salaamayaa, kan socdaana kan fadhiya ayuu salaamayaa, dadka yarina kuwa badan bay salaamayaan"

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-dadka wuxuu baray aadaabta dadku isu salaamaan, taasoo ah "Asalaamu calaykum wa raxmatu Alaah wa barakaatuh", Qofka yari wuxuu salaamayaa kan wayn, kan wax fuushana kan lugaynayana, kan lugaynayana kan fadhiya, kuwa tirada yarina kuwa tirada badan.

<https://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/4243>

